

**Buugyaraha Ereybixinta
Xuquuqda Dhijitaalka ee
Af Soomaaliga**



Somali Digital Rights Lexicon

Buugyarahani waxaa ku jiraa ereybixino iyo qeexitaano Af Soomaaliga oo la xiriira saameynta tignoolojiyada ay ku leedahay bulshada casriga ah iyo mas'aaloyin ku saabsan xuquuqda dhijitaalka. Mashruucan waxaa dhiirigalin u ahaa turjumaad iyo ereybixino kuwan la mid ah oo qaab wadajir loogu soo saaray Af Swahiliga waxaana hogaaminaaye Nanjala Nyabola.






Mashruuca buugyaraha ereybixinta Af Soomaaliga waxaa isku dubariday Mohamed Abdimalik (Jaantus) iyo Peter Chonka (King's College London). Hawshan waxay qayb ka ahayd mashruuc cilmi-baaris ah oo loo yaqaano Datafication and Digital Rights in East Africa, waxaana maalgeliyay UKRI (Global Challenges Research Fund).

Dad badan ayaa ka qayb qaatay turjumaadani, qaar waxay ka qayb galeen shir aqoon iswaydaarsi lagu qabtay magalaada Muqdisho sanadkii 2021, qaarna waxay ku darsadeen talo iyo tafatir:

*Abdinasir Yusuf Moalim; Shukri Ahmed Siyad; Munira Omar; Abdullahi Mohamud Hassan (Beerey); Abdifitah Ali Mohamud; Mohamed Muhumed; Farah Nur; Najma Mohamud Omar; Mohamud Ali Adan Hoori; Mohamud Abdi Mohamud; Hassan Ali Osman (Istiila); Abdiaziz Ahmed Barrow; Aweis Ahmed; Ayaan Khalif; Mohamed Bashir Omar; Abdi Yussuf Abdullahi; Abdikadir Abdi Ahmed; Hassan Abdullahi Qaraabo; Ahmed M. Musa; Nuur Diiriye Xirsi (Fuursade).*¹




¹ This booklet contains Somali language definitions of many words related to the social impact of technologies on modern societies and questions of questions of digital rights. The project was inspired by the collaborative translation of a similar set of terms into Kiswahili that was led by Nanjala Nyabola.



The Somali lexicon project was led by Mohamed Abdimalik (Jaantus) and Peter Chonka (King's College London). The work was undertaken as part of the Datafication and Digital Rights in East Africa research network, which was funded by the UKRI's Global Challenges Research Fund. Various people (listed above) took part in the translations, both in a workshop held in Mogadishu in 2021, and as reviewers of the final document.

<p>Algoordan</p> <p>Waa hab ama xeerar la raaco marka wax la xisaabinaayo ama lagu xalinaayo dhibaatooyin jira gaar ahaan marka la adeegsanayo kombiyuutar.</p>	<p>Algorithm</p> <p>A step-by-step procedure for solving a mathematical problem or accomplishing a specific end: rules used by a computer to sort through a mathematical problem.</p>
<p>Falanqeyn</p> <p>Waa hab lagu lafaguro xog ceyriin si looga dhigo mid micno ama nuxur samaynayso iyada oo la adeegsanayo kombiyuutar.</p>	<p>Analytics</p> <p>The process of analyzing raw data in order to make sense of that information. A careful and complete analysis of data using a model, usually performed by a computer; information resulting from this analysis.</p> 
<p>Garaad Macmal</p> <p>Daraasadda iyo horumarinta hababka kombiyuutarada ee mateli kara caqliga iyo dabeecadda aadanaha.</p>	<p>Artificial Intelligence</p> <p>The study and development of computer systems that can copy intelligent human behavior.</p> 
<p>Kasjile</p> <p>Barnaamij kombiyuutar oo si madax-bannaan ula falgeli kara isticmaalayasha qadka (Intarneetka), aaladaha iyo kombiyuutarada. Waxaa loogu talagalay inuu iskii u fuliyo shaqo farsamo soo noqnoqda, wuxuu ku daydaa dabeecadaha dadka.</p>	<p>Bot/Bots</p> <p>A computer program that runs automated tasks over the internet, e.g., mimicking human behaviour online.</p>
<p>Xog</p> <p>Xaqiiqooyin ama macluumaad, gaar ahaan marka arrin la baarayo ama loo isticmaalo in lagu gaaro go'aan.</p>	<p>Data</p> <p>Facts or information, especially when examined and used to find out things or to make decisions.</p> 
<p>Gaaryeelidda Xogta</p> <p>Waa awoodda qofku u leeyahay in isagu go'aamiyo goorta, sida, iyo ilaa xadka macluumaadka shakhsiyadeed ee isaga ku saabsan lala wadaagi karo ama lala socodsiin karo dadyow kale.</p>	<p>Data privacy or Information Privacy</p> <p>Branch of data security concerned with the proper handling of data – consent, notice, and regulatory obligations. More specifically, practical data privacy concerns often revolve around whether or how data is shared with third parties.</p> 
<p>Ilaalinta Xogta</p> <p>Xakamayn sharciyeed oo gaaryeeleyso macluumaadka lagu keydiyay kombiyuutarada sidoo kalena xadideysa cidda aqrin karta ama isticmaali karta.</p>	<p>Data Protection</p> <p>Legal controls that keep information stored on computers private and that limit who can read it or use it.</p> 

Xog Gurid	Data Scraping
<p>Waa farsamo ama barnaamij kombiyuutaradu xog kaga soo uruuriyaan mareegaha Intarneeetka si loogu isticmaalo siyaabo kala gedisan tusaale ahaan, falanqayn.</p>	<p>A usually automated process where a technology takes data from a particular program or websites for a variety of uses that usually results in aggregation for analysis.</p>
Xog-sidkan	Dataset
<p>Waa koox xog oo isla xidhiidha, isleh, si gooni gooni ama si guud ahna loo maareeyo.</p>	<p>A structured collection of data generally associated with a body of work.</p>
Xogdhig	Database
<p>Waa xog nidaamsan oo ku keydsan kombiyuutarka si electaroonig ah taasoo siyaabo kala duwan loo heli karo.</p>	<p>An organized collection of data stored as multiple datasets. Those datasets are generally stored and accessed electronically from a computer.</p>
Gees ka Gees Gamaamudan	End to End Encryption
<p>Waa nidaam isgaarsiineed taasoo isticmaalayaasha isgaarsiinta ay si qarsoodi ah u wadaagi karaan fariimo dhijitaal ah.</p>	<p>The protection of data sent over digital platforms so that only the sender and the receiver can read it.</p>
Shabakad	Network
<p>Waa koox dad ah ama shirkado oo si dhow isugu xiran kuwaas oo isdhaafsada macluumaad.</p>	<p>A closely connected group of people, companies, etc. that exchange information, etc.</p>
Sinaanta Shabakadda	Network Equality
<p>Waa xaalad qof kasta u suurto gelinaysa in uu helo Intarneeet (qad) tayo leh iyadoo aanan la eegeenin qofkuu yahay iyo goobta uu ku suganyahay.</p>	<p>A situation in which everyone has reasonable access to quality internet without respect to whom and where they are.</p>
Helitaan Furan	Open Access
<p>Waxyaabo qof kasta oo u baahan uu ku heli karo si furan oo bilaash ah.</p>	<p>The fact of something being freely available to anyone who wants it.</p>
Il furan	Open Source
<p>Waa shati u oggolaanaya qof weliba inuu si xor ah u adeegsado barnaamij cid kale samaysay sida softweeer ama xog, waxna ka badali karo siina wadaagi karo.</p>	<p>Used to describe software for which the original source code is made freely available to anyone to adapt or share.</p>
Saadaal	Prediction
<p>Waa kelmed tilmaan ka bixinaysa sida ay wax dhici doonaan timaadada.</p>	<p>A statement that says what you think will happen; the act of making such a statement.</p>



<p>Qad/Intarneet</p> <p>Qad ama Intarneetku waa nidaam caalami oo isku xidha shabakad kombiyuutaro ah.</p>	<p>Internet </p> <p>The global system of interconnected computer networks.</p>
<p>Mala Awaal</p> <p>Waa wax jira, la arki karo, ama u dhacaya hab onlayn ah iyado laga arkaayo shaashad kombiyuutar, halkii ay ka ahaan lahaayeed wax la taaban karo.</p>	<p>Virtual</p> <p>Being on or simulated on a computer or computer network, occurring or existing primarily online.</p>
<p>Gamaamud</p> <p>Waa hab lagu qarin karo xogta taas oo uu aqrin karo kaliya cid loogu talagalay.</p>	<p>Encryption </p> <p>The process of scrambling or enciphering data so it can be read only by the person it is intended for.</p>
<p>Kiiboodhyada horumarsan</p> <p>Waa barnaamij ama qalab lagu daro kiiboodhka kombiyuutar-ka si looga dhigo mid ay adeegsan karaan dadka baahiyaha gaar ka ah qaba.</p>	<p>Keyboard Enhancements</p> <p>Software or hardware that is added to computer keyboards in order to make them accessible to persons with disabilities.</p>
<p>Farqiqa Dijitaalka</p> <p>Waa farqiqa u dhaxeeya dadka leh xirfadaha adeegsiga tiknoolajiyadda casriga ah iyo kuwa aanan lahayn ama aanan heli karin aaladhaa tijnoolajiyadda.</p>	<p>Digital Divide</p> <p>The gap between those who have the ability to access and use the latest technology and those who do not.</p>
<p>Dhalanrog</p> <p>Waa warbaahin macmal ah oo qofkii hore ugu jiray sawir ama muuqaal lagu beddelayo qof kale oo u eg oo ay abuurtay barnaamijka kombiyuutar ee barashada qotoda dheer iyo AI.</p>	<p>Deepfakes</p> <p>Synthetic media in which a person in an existing image or video is replaced with someone else's likeness, created by deep learning and AI.</p>
<p>Marin Habaabin</p> <p>Xog been ah oo si badheedh ah loo bixiyo.</p>	<p>Disinformation </p> <p>False information that is given deliberately.</p>
<p>Kicin</p> <p>Falka lagu dhiirigelinayo qof inuu sameeyo wax rabshado ah, sharci darro ah ama aan wacnayn.</p>	<p>Incitement</p> <p>The act of encouraging somebody to do something violent, illegal or unpleasant.</p>
<p>Baaweyn</p> <p>Warbixin ku salaysan xaqiiqada, loo isticmaalo in qof, urur ama waddan dhibaato loo geysto.</p>	<p>Malinformation</p> <p>Information that is based on reality, used to inflict harm on a person, organization or country</p>

<p>Beenguur</p> <p>Faafinta ama bixinta macluumaad khaldan oo arrin ku saabsan; war qaldan oo la bixiyo.</p>	<p>Misinformation</p> <p>The act of giving wrong information about something; the wrong information that is given.</p>
<p>Baraha Bulshada</p> <p>Mareegaha iyo barnaamijyada softaweer ee loo isticmaalo isku xirka bulshada.</p>	<p>Social Media</p> <p>Websites and software programs used for social networking.</p>
<p>Bar-weerar</p> <p>Inaad internetka ku qorto fariimo been ah ama meel ka dhac ah si aad dadka kale uga cadhaysiiso.</p>	<p>Trolling</p> <p>To write false or offensive messages on the internet in order to make other people angry.</p> 
<p>Sharaxaad</p> <p>Habka loogu beddelo qoraal xogta maqalka ee baahinta telefshinka, duubista mareegaha, filim, muqaal, CDROM, DVD, dhacdo toos ah, ama wax soo saar kale. Sidoo kale waa kusoo bandhigista qoraalka shaashadda, ama nidaamka kale ee bandhigga muuqaalka ah.</p>	<p>Caption</p> <p>The process of converting the audio content of a television broadcast, webcast, film, video, CDROM, DVD, live event, or other productions into text and displaying the text on a screen, monitor, or other visual display system.</p>
<p>Shaashada Akhriye</p> <p>Nooc ka mid ah tignoolajiyada caawinta kaas oo ka dhigaya qoraalka iyo waxa ku jira sawirka sida hadalka ama soo saarista farta bareylka. Shaashad Akhriye waxay lama huraan u yihiin dadka araga la' waxayna faa'iido u leeyihiin dadka aragga naafada ka ah, kuwa aan waxna akhriyin, ama qaba naafanimo la xiriira waxbarashada.</p>	<p>Screen Reader</p> <p>A form of assistive technology (AT) that renders text and image content as speech or braille output. Screen readers are essential to people who are blind, and are useful to people who are visually impaired, illiterate, or have a learning disability.</p> 
<p>Bar Weyneye</p> <p>Barnaamij kombiyuutar la xidhiidha soo saarista muuqaalada kombiyuutarka si u shaashada ugu soo bandhigo xogti oo weyn. Marka la ballaariyo qayb (ama dhammaan) shaashadda, dadka aragga naafada ka ah waxay si wanaagsan u arki karaan ereyada iyo sawirrada.</p>	<p>Screen Magnifier</p> <p>A software that interfaces with a computer's graphical output to present enlarged screen content. By enlarging part (or all) of a screen, people with visual impairments can better see words and images.</p>
<p>Shaashada Bareylka</p> <p>Waxay siisa macluumaadka shaashadda kombiyuutarka ee loogu talagalay dadka aragga naafada ah iyagoo kor u qaadaya marna hoos u dhigaya isku-dhafka kala duwan ee biinnada unugyada bareylka.</p>	<p>Braille Displays</p> <p>Provide access to information on a computer screen for visually impaired people by electronically raising and lowering different combinations of pins in braille cells.</p>

Bedel Aalad Gashi

Waa hardaweer ama softaweer xal u ah isticmaalayaasha naafada ah ama leh naafanimo kala duwan una sahla adeegsiga kombiyuutarka. Bedel Aalad Gashi waxay u oggolaanayaan isticmaaluhu inuu isticmaalo kombiyutarka si kasta oo iyaga ugu habboon sida isagoo isticmaalaya cagaha / madaxa, isha, afka, neefta, suulka, ama far keliya.

Alternative Input Devices

These are hardware or software solutions that allow users with a variety of disabilities or impairments to access a computer in a different way. Alternative input devices allow the user to access a computer in whatever way works best for them such as using his/her feet, head, eye, mouth, breath, thumb, or a single finger.

Xogsawir

Waa in macluumaadka lagu soo bandhigo qaabka jaantuska, qariidada, sawirka, IWM.

Data Visualization

The representation of information in the form of a chart, diagram, picture, etc.



Sawir Roge

In loo beddelo sawirka qaab dhijitaal ah iyadoo la isticmaalayo aaladaha lagu naqshadeeyo sawirada sida softaweerka Photoshop.

Photoshop/Image Manipulation

To alter a photographic image digitally using Photoshop image-editing software.

Macluumaad Dhexdhexaadin

Habka ay madal online ah (tusaale shirkadda baraha bulshada) ay ula socoto macluumaadka isticmaaluhu soo saaran (tusaale qoraallada warbaahinta bulshada) iyadoo lagu salaynayo xeerar iyo habraacyo u gaar ah madal si loo go'aamiyo in waxa ku jira loo oggolaanayo inay ku sii jiraan barxadda khadka iyo in kale.

Content Moderation

The process by which an online platform (e.g. a social media company) monitors user-generated content (e.g. social media posts) based on platform-specific rules and guidelines to determine if the content should be allowed to remain on the online platform, or not.

Daqliga Baraha Bulshada

Suurtagalnimada shaqsiyaadka isticmaala baraha bulshada ee leh taageerayaal badan ay uga samayn karaan lacag muuqaalkooda, astaanta, ama boggooda iyada oo loo marayo iibinta tooska ah ama xayeysiinta.

Social Media Monetization

The possibility for social media users with many followers to make money from their image, brand, or page through direct sales or advertising.

Eexda Algoordanka

Waa gefaf ama janjeer habaysan oo ku yimaada nidaamka kombiyuutarka taaso keenta natiijooyin aanan cadaalad ahayn, sida in eex lagu fadilo koox ka mid ah isticmaaleyaasha. Eexda waxay ka imaan kartaa arrimo badan oo ay ka mid yihiin cilad dhanka naqshadaynta algoordnka, ama qaabka xogta loo soo uruuriye ama loo isticmaalay marka la tababaraayo algoordanka.

Algorithmic Bias

Describes systematic and repeatable errors in a computer system that create unfair outcomes, such as privileging one arbitrary group of users over others. Bias can emerge due to many factors, including the design of the algorithm or the unintended or unanticipated use or decisions relating to the way data is coded, collected, selected or used to train the algorithm.

Daahsoon

Xaaladda libirsanaan - waa in inta badan dadka kale aysan ku aqoonsan karin. Daahsoonaanta qadka waxa loola jeedaa in aad xogtaada khaaska (sida goobta aad ku sugan tahay, cinwaanka IP-ga, IWM) ah ka qarisdid shabakadaha aad isticmaasho ama isticmaalayaasha kale.

Barta Madaniga/ Fagaare

Waa goob u ogolaaneeysa muwaadiniinta inay isu yimaadaan, wadaagaan danaha, fikrado, talo, raasimaal, dhaqaalo ay ku qaabeeyaan arimaha bulshada iyo kuwa siyaasadeed.

Halabuur Wadaag

Waa shati ogolaanayo in halabuur qof sameeyay lasoo rogtu, la baahiyo, wax lagu daro, la tafatiro, ama lagu sii dul dhisto shaqo aad adigu leedahay.

Faduulin

Waa u adeegsiga fariimaha lagu wadaago baraha bulshada, aaladdaha kale Intarneeetka iyo tiknoolajiyada in qof lagu dhibo, lagu cabsi geliyo ama looga xanaajiyo.

Amniga Qadka

Waa in laga ilaaliyo shabakadaha, aaladaha, iyo xogta gelitaan aan la ogalayn, isticmaal, ama in loo adeegsado dambiyo.

Badqabka Mareegta

Waa talaaboyin u qofku ku badbaadi karo marka u isticmaalayo qadka. Waxaa ka mid ah in u muujiyo fejjignaan iyo ka warqab khataraha amni ee uga imaan kara isticmaalka qadka sida xatooyo aqoonsi, hanti, xog, iyo inaad iska ilaalisid dembiyada kombiyuutarka.

Aqoonsi dhijitaal ah

Waa guud ahaan macluumaadka ku saabsan shakhsi, urur ama qalab elektaroonig ah oo ku jira ama laga heli karo qadka.

Anonymity

The state of remaining unknown to most other people. Online anonymity refers to hiding your personal data like your location, IP address, etc. from the websites you use or from other users.

Civic Space

Civic space is the environment in which citizens can come together and share their interests, ideas, advice, concerns and resources to influence and shape society and policy-making.



Creative Commons

A set of various licenses that allow people to share their copyrighted work to be copied, edited, built upon, etc., while retaining the copyright to the original work (often used attributively).

Cyberbullying

The activity of using messages on social media, emails, text messages, etc. to harm, frighten or upset somebody.

Cybersecurity

Cybersecurity is the act of protecting networks, devices, and data from unauthorized access or criminal use.



Digital/ Internet safety

The act of trying to be safe on the internet; maximizing a user's awareness of personal safety and security risks to private information and property associated with using the internet, and self-protection from computer crime.



Digital Identity

Is the body of information about an individual, organization or electronic device that exists online.

<p>Aqoonta dhijitaalka</p> <p>Waa awoodda isticmaalka macluumaadka iyo teknoolojiyadda isgaarsiinta si loo helo, loo qiimeeyo, loo abuur loona gudbiyo macluumaadka, taas oo u baahan xirfado garasho iyo farsamo.</p>	<p>Digital literacy</p> <p>Digital literacy is the ability to use information and communication technologies to find, evaluate, create, and communicate information, requiring both cognitive and technical skills.</p>
<p>Kashifid</p> <p>Falka ah in si guud loo faafiyo macluumaad gaar ah iyada oo aan oggolaansho laga helin shakhsi ama urur iyada oo loo marayo Intarnetka</p>	<p>Doxing</p> <p>The act of publicly revealing previously private personal information about an individual or organization, usually through the Internet.</p>
<p>Xoriyada Iskaashiga</p> <p>Xaqa la kulanka dadka iyo in la sameeyo urur aan fasax uga baahnayn dawladda.</p>	<p>Freedom of Association</p> <p>The right to meet people and to form organizations without needing permission from the government.</p>
<p>Xoriyadda Hadalka</p> <p>Awooda ama xaqa uu qofku u leeyahay in uu ra'yigiisa dhiibto iyada oo aan la faafreebin, la xakamayn, ama ciqaab sharci ah la saarin.</p>	<p>Freedom of Expression</p> <p>The power or right to express one's opinions without censorship, restraint, or legal penalty.</p> 
<p>Xoriyadda Gudbinta Ra'yiga</p> <p>Xaqa uu qofka ku gudbin karo ra'yi kasta asaga oo aan la kulmaynin xakameyn dhinaca dowladda ka yimaada. Waxa kale oo loo yaqaan xorriyadda hadalka.</p>	<p>Freedom of Opinion</p> <p>The right to express any opinion in public without censorship or restraint by the government. Also called free speech.</p>
<p>Tacaddi</p> <p>Falka qof looga cadhaysiiyo ama lagu murjiyo qaasatan marka cadaadis la saaro, lagu sheego ama lagu sameeyo wax aan wanagsanayn.</p>	<p>Harassment</p> <p>The act of annoying or worrying somebody by putting pressure on them or saying or doing unpleasant things to them.</p>
<p>Xatooyo Aqoonsi</p> <p>Xatooyo Aqoonsi waxa uu dhacaa marka qof uu xado xogtaada gaarka ah si uu dhagar ugu sameeyo. Qofka xada aqoonsiga waxa uu xogtaada u adeegsan karaa inuu amaah ku qaato, canshuur dhaaf ku dalbado, ama adeeg caafimaad ku helo. Tillaabooyinkan waxa ay dhaawici karaan sumcadaada, waxa ayna keeni kartaa in qarash iyo waqti uu kaaga baxo si aad magacaaga u soo ceshatid.</p>	<p>Identity theft</p> <p>This happens when someone steals your personal information to commit fraud. The identity thief may use your information to apply for credit, file taxes, or get medical services. These acts can damage your credit status and cost you time and money to restore your good name.</p> 

<p>Hantida Garaadka</p> <p>Aragti ama naqshad, IWM, kuwaas oo uu qof hindisay, xeerarka dalkuna ay ka mamnuuceen in dadka kale ay si bilaash ah u qaatan.</p>	<p>Intellectual Property</p> <p>An idea, a design, etc. that somebody has created and that the law prevents other people from copying.</p>
<p>Dhexdhexaadnimada Internetka</p> <p>Mabda' ah in haya'daha bixiya internetka ay dadka u ogolaadaan booqashada degelladda, mareegaha iyo barnaamijyadda internetka, ayaga oo aan xannibin ama si gaar ah u xayeysiin badeecad, mareeg ama degel gaar ah.</p>	<p>Net Neutrality</p> <p>The principle that internet service providers should allow access to all websites and programs without trying to block or promote particular sites or products.</p>
<p>Xeer</p> <p>Sharci ama nidaam rasmi ah oo ay soo samayso dawlad ama hayad / maamul kale.</p>	<p>Regulation</p> <p>An official rule made by a government or some other authority.</p>
<p>Aargoosi Cawrays</p> <p>Waa soo bandhigidda sawirrada ama muuqaallada galmada ee uu qof soo dhigo internetka, sida caadiga ah lammaane isu tagay oo xummaan laga faafiyo iyada oo aan oggolaansho laga haysan si ay u keento dhibaataayn iyo ceebayn.</p>	<p>Revenge Pornography</p> <p>Revealing or sexually explicit images or videos of a person posted on the internet, typically by a former sexual partner, without the consent of the subject and in order to cause them distress or embarrassment.</p>
<p>Xuuraan</p> <p>La socodka habdhaqanka, howlaha, iyo macluumaad ujeeddaduna tahay uruurinata xog arrin lagu maareeyo. Waxaa ka mid noqon kara in macluumaadka lagala socdo meelo fogfog iyada oo la adeegsanayo qalabka elektaroonigga ah sida (CCTV) ama dhexda laga qabto macluumaadka lagu wadaago Intarneetka iyo boostada.</p>	<p>Surveillance</p> <p>Monitoring of behavior, activities, or information for the purpose of information gathering, influencing, managing or directing. This can include observation from a distance by means of electronic equipment, such as closed-circuit television (CCTV), or interception of Internet traffic or post.</p> 